



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Nabadgelyada iyo Amniga Dhismayaasha Dugsiyada

Diisembar 14, 2022

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Qof kasta oo ka mid ah Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu aaminsan yahay in goobaheena waxbarashadu noqdaan kuwo ammaan ah, degan iyo in la hubiyo nabagelyadooda, iyo waliba waxa aynu wadaagnaa mas'uuliyada sidii aan u xaqiijin lahayn nabadgelyada iyo fayo-qabka ardayda aynu amnigooda ka mas'uulka nahay. Waxaynu aqoonsanahay in dhacdooyiinkii dhawaan dhacay, haddii ay yihiin kuwa ka dhacay deegaankeena iyo wadankaba inay gilgileen bulshadeena.

Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero wuxuu soo saaray baaq ballaaran oo ku saabsan rabashadaha hubka iyo saameyn ay ku leeyihii dugsiyadeena, laakiin waxaanu sidoo kale rabnaa inaan sharaxno sidii ay dugsiyadu u noqon lahaayeen kuwa amni ah iyo sidii aan idii wargalin lahayn labadaba.

Marka laga hadlayo khatarta markaasi taagan, hoggaamiyaasha dugsiyadu waxay mudnaanta siin doonaan nabadgelyada ardaydooda, iyaga oo raacaya xaqiiqooyin la sugay iyo hubinaya xogta. Isla markaasi, haddii ay ciidanka nabadgelyadu sugayaan nabadgelyada goobta markaasina bilaabaya baaritaankoodii. Marka la helo war sugar oo la idinla wadaago waxaa lala xiriiri doonaa qoysaskii ay saameynta dhacdadu ku yeelatay. Dunidani casriga ah ee telefoonka gacanta iyo baraha bulshadu, taasi macnaheedu waxaa weeyaan macluumaadka waxaa suurtagal ah inuu idinku soo gaadho dariiqooyin aan ahayn kuwii dugsiga ka hor inta ayna hoggaamiyaasha dugsiyadu idinla soo xiriirin. Fadlan waxaad ogaataan in mar walba aanu rabno inaan sida ugu degdeg badan ee suurtagal idinla soo xiriirno iyada oo la eegayo baahida waqtigaasi.

Marka hoggaamiyaasha dugsiyadu ay ogaadaan xaalad kasta oo khatar ah- haddii ay tahay markaasi mid taagan ama mid kaleba- waxay la xiriiraan khabiirada dugsiyada degmada sidii ay u qiimeyn lahaayeen. Waxay kaga bilaabaan agaasiimaha aaggaa oo isaguna la xiriira guddoomiye-xigeenka waxbarashada, Addeegyada Maareynta Xaalada Degdeg ah, ama qof ka socda kooxda guusha ardayda iyo Caafimaadka. Haddii ay jirto khatar taagan markaa dugsigu waxay bilaabi doonaa qorshaha hawlaho degdeg ah ee dugsiga iyada oo si degdeg ah loo wacayo 911. Waxaa kale oo suurtagal ah in lala tashado hya'adaha kale ee dawlada kuwaasi oo leh khabiirada khataraha. Si wada jir ah, waxaan u qaadneynaa tallaabooyin ku haboon sidii aan u ururin lahayn xog dheeraad ah, sida:

- Waraysi lala yeesho ardaya
- In la baaro guud ahaan dugsiga iyo meelihi kafee ee aaga dugsiga ee loo baahdo



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

- In dib u eegis lagu sameeyo wixii la soo dhigay baraha bulshada ama lagu wada xiriiray
- In la waco waalidiinta ama daryeelayaasha ardaya

Si wada jir ah, khabiirada dugsiyada degmada iyo hoggaamiyaasha dugsiyadu waxay go'aamin waqtiga ugu haboon ee jawaab laga bixinayo. Haddii ay xaaladu ay tahay mid u baahan nabadgelyo degdeg ah ama baaritaan mug leh, madaxda dugsigu waxay wici doonaa ciidanka nabadgelyada ee booliska. Haddii ay jirto khatar culus oo gudaha dhismaha dugsiga ah, dugsiga waa la xiriiri doonaa, taasi oo macnaheedu yahay dhammaan fasalada waa la xiri doonaa iyada oo ardayda/macallimiintu ay ku sugnaan doonaan gudaha ilaa iyo inta khatarta hubinayo. Haddii ay ka jirto khatar culusi bannaanka dhismaha dugsiga, dugsiga waxaa la galin doonaan in la hubiyo nabadgelyada, sidoo kalena loo yaqaan inaan bannaanka dugsiga looga bixin karin lana soo galin karin. Tani macnaheedu waxaa weeye dhammaan iridaha bannaanka dugsiga waa la xiri doonaa iyada oo aan cidina soo galin karin ama ay ka bixin karin dhismaha dugsiga ilaa khatarta laga hubinayo. Haddii ay jirto walwal khatar oo waqtii dheer, kooxda Nabadgelyada PPS waxa suurtagal ah inay ku soo kordhiyaan shaqaalaha dhinaca nabadgelyada ah oo dheeraad ah dhismaha dugsiga.

Si kastaba xaalad kasta ha ahaatee, hoggaamiyaasha dugsi waxay qaadi doonaan tallaabooyin kor loo qaaday sidii ay isha ugu hayn lahaayeen dhismaha dugsiga oo dhan, iyaga oo furayo khadad isgaarsiineed oo shaqaaluhu dhexdiida ku wada xiriirayaan, in kor loo qaado wacyiga xaalada ee shaqaalaha iyo ardayda dhexdooda, iyo in la siiyo macluumaad dheeraad ah weydiistaan ardayda iyo qoysaska.

Dhismayaasha dugsiyadu waxay ku qalabeysan yihiin qalab kale duwan oo ah kuwa xaaladaha degdega ah loo baahan yahay. Dhammaan dugsiyadu waxay leeyihiin iridaha la maamulo soo galintooda iyo ka bixintaankooda iyada oo si buuxda loo ilaaliyo inta lagu jiro maalintii dugsiga. Inta badan dugsiyadeenu waxay leeyihiin irid gaar ah oo laga soo galo dugsiga taasi oo dhammaan booqdayaasha ay tahay inay isticmaalaan gambaleelka iyaga oo codsanaya inay soo galaan ka dib marka waxbarashada dugsi bilaabanto. Wuxaan u mahadcelineynaa Deeqdii Maalgalineed ee sanadkii 2020, dhammaan albabada fasalada waxaa lagu sameynayaa qalab kor loogu qaadayo kaasi oo u oggolaanaya in albaabada fasalada gudaha laga xiri karo. Dhammaan dugsiyada waxay leeyihiin cod-baahiye fariimaha degdeg ah laga maqli karo dhismaha dugsiga oo dhan, iyo nidaam kastaa waxaa laga hawlgalin karaa teleefan kasta oo dhismaha dugsiga yaala. Inkasta oo tirada kamaradaha dugsiyadu ay kala duwan yihiin, dhammaan dugsiyada waxay leeyihiin kamarado lagala socda dhaqdhaqaaha kasta oo ka socda dhismaha. Dhaqaalihii maalgalineed ee dhinaca nabadgelyada, waxaan ku kordhineynaa dhammaan dhismayaasha dugsiyada kamarado gudaha iyo dibada ah. Iyo, sida aad inta badan ka maqashaan ardaygaaga, dugsiyadeenu waxay sameeyaan tababaro dhinaca xaaladaha degdeg ah sanadka oo dhan(oo ay ku jiraan labo tababaro layli oo ah ku saabsan marka ay jirto khatar culusi).



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Marka jawaabta la go'aamiyo, hoggaamiyaasha dugsigu waxay go'aamin sida iyo haddii la xiriirayo bulshada dugsiga. Xaalad kasta, hoggaamiyaasha kala gedisan ee ka qeybqaadanayaan waa inay dheelitiraan sidii ay bulshada u wargalin lahaayeen, ilaalin lahaayeen habka baaritaanka, iyo iyaga oo aan abuurin qaylo-dhaan. Marka aan idinla soo xiriirno, inta badan waxaan idinla wadaagnaa faahfaahin kooban maadaama ay arrinta aan idinkala hadlaynaa ay wali baaris ku jirto- baaritaanku waxa suurtagal ah inay la xiriiraan macluumaad qarsoodi ah oo ku saabsan arday kaasi oo uu ilaalinayo Xeerka Federaalka ee Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Qarsoodiga(FERPA).

Waxaan aqoonsanahay inaad na siiseen kalsoonida amniga ardaydiinu sidii ay dugsiyada nabadgeleyo wax ugu baran lahaayeen. Fadlan waxaad ogaataan inaan mas'uuliyada u qaadano si dhab ah, iyo inaan ku dadaalmo inaan xurmeyno sidii aan u ilaalin lahayn ballanqaadkaasi maalin kasta. Wuxaad idiinka mahadcelineynaa sida aad noogu aaminteen ardaydiina.